# RASMI AH

# الجريدة الر

لجمهورية للصومال الديمقراطية

Muqdisho, Feferaayo 1R2

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan J:D.S.

جريدة شهرية


5 lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K O O B N I I N

## BOGGA KOOWAAD

## S H A R C I


L. 8 ee Fer. 1977, *Xilka Iyo Awoodda Gud-* *Bogga* 125

9 ee 3 Feb. 1977, *Sharciga Ganacsiga iyo Dha-* » 130

10 ee 3 Feb. 1977, *Baahinta Wasaaradda aha Gudaha.* » 133

11 e 3 *Wasaaradda* » 135

12 ee 3 Feb *Wasaaradda* » 137

L. 13 ee 3 Feb. 1977, *Dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed oo hoos Inaanaya Madaxweynaha J. D. S.* » 139


## BOGGA LABAAD

## X E E R


*as* *L. 17* » 140


**WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA**

---

Sharciga Ganacsiga Dhaqaalaha Lam. 9 3.2.1977
3 ee 1.31977,

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA 27.10.1977,Heer *ka Sarrifka lacagaha qalaad L. 40* » 141

MAXKAMADDA GOBOLKA GALGUDUUD 17.11.76, Lumid Jeegga wareega L. 100896,28.7.76 L. 41 » 142

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 15.2.77, *Lumid Buugga kaydka L. 9571, ku qoran Sh. So. 1.515 uu leeyahay Faarax Maxamed Cali L. 42* » 143

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 17.2.77, *Lumid Buugga kaydka L. 10275 ku qoran Sh. So. 2.253, u leeyahay Maxamed Maxamuud Axmed L. 43* » 144

WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED «Bayl» *10.2.1977, ogeysiis Shir Saamiley. L. 43 Bis* » 145



## BOGGA KOOWAAD

## S H A R C I

SHARCI L. 8 ee 13 Feb. 1977, Xilka iyo Awoodda Guddiga Dhexe ee Baarista.

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 17 18 iyo 19 ee 1da Luulyo 1976, oo ku saabsanaayeen la wareegidkii Xisbiga Hantiwadaaagga Kacaanka Soomaaliyeed Xukunka iyo Awooddii Maamulka Dalka,

ISAGOO ARKAY: Qodobka 18aad ee Xeerka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed oo lagu dhisay Guddiga dhexe ee Baarista oo ku hawl leh inuu eegaa dhaqsaha iyo habsamida socodka hawsha Hay'adaha Dhexe iyo Khasnadda Xisbiga iyo Hantida Dawladda;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in xilka iyo Awoodda Guddiga Dhexe ee Baarista ay ku leeyihiin hantida Dawladda iyo midda Qarankaba la nidaamiyaa laguna soo saaraa Sharci;

ISAGOO ARKAY: Talada Guddiga Dhexe ee Baarista Xisbiga;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Siyaasiga ee Golaha Dhexe XHKS.

WUXUU SOO SAARAYAA
SHARCIGA SOO SOCDA

### Qodobka 1aad

*(Xilka Guddiga Dhexe ee Baarista)*

Guddiga Dhexe ee Baarista X.H.K.S. waa Hay'adda ugu sarraysa Baarista Dalka, wuxuuna ku leeyahay xil baarid iyo kormeer joogta ah hawlaha Qaranka, khaas ahaan dhinaca Maaliyadda iyo Xisaabaha hantida dawladda iyo Xisaabaadka Shirkadaha marka dantacaamka ahi ku jirto.

Guddiga Dhexe ee Baaristu si xilkiisa uu u guto wuxuu si toos ah u baari karaa Xisaabaha ay maamulaan hay'adaha Dawladda ama Hay'ad kasta ay Dawladdu qayb ku leedahay ama meel kastoo danta caamka ahi ku jiro ee la xiriirta Dhaqaalaha Dalka.

## Qodobka 2aad

*Baarista hantida hay'adaha Dawladda* iyo *Awoodda*

*Guddiga Dhexe ee Baarista*

Iyadoon waxba iska beddelin Sharciyada la xiriira baar'sta xisaabaha iyo hantida Dawladda, Guddiga dhexe ee Baaristu wuxuu awood u leeyahay:

1. Inuu siiyo awaamiir iyo tusaalooyin (xagga daryeelka xisaabaadka) Hay'ad kasta oo maamusha ama baarta hantida Dawladda;

2. Inuu si toos ah u baaro awaamir iyo tusaalooyinna siin karo Hay'ad kasta ee maamusha hantida Dawladda;

3. Inuu dib u eegaa wax kasta oo horay ay u baareen xubnaha Dawladda ee baarista hantida Ummadda, (Hantidhowrka, Nabadsugidda, Booliska iwm) haddii sidaas dan caam ah ay ku jirto, isagoomar waliba ku amr: kara Hay'adda qaabilsan baaritaankaas in ay u soo gudbiso qoraallada iyo warqadaha la xiriira baarista hore.

## Qodobka 3aad

*(Habka baarista iyo awoodda Guddiga dhexe ee Baarista)*

1. Habka Baarista

Gudd'ga Dhexe ee Baaristu, marka ay baarayaan xisaabaha ay maamulaan hay'adaha Dawladda, waxay raacayaan habka baaritaanka xisaabaadka Maamulka Guud ee Dawladda u qoran, waxayna awood u leeyihiin in ay amraan in la joojiyo, la qabto, ama la xiro c'd allaale ciddii uu galo ama lagu tuhmo raad ah lunsasho, xatooyo, isdhaafsiin ama dayacid iyo maamul xumo xoolo Dadweyne.

2. Xogwarran fal ciqaabeed

Haddii baarista Xisaabaadka la sameeyey uu ka soo baxo fal noqon kara dembi lid ku ah hantida guud ee Dawladda (Wasaaradaha, Bankiyada, Wakaalaadaha, Dawladda Hoose, Sh:rkadaha ay Dawladdu saami ku leedahay), Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee Baarista, ku .. xubnaha
ciddii ay wakiishaan, waxay si . xogwarran u gud-
binayaan Xeer Ilaaliyaha ku leh. Xeer Ilaaliyuhu
markii uu heio ku dhaqaaqayaa
tallaabooyinka la .. cacwadda ciqaabaad-
ka sida ku qoran , iyo 71 ee XHC.



Ka reebid xirid dacwo

Iyadoo la gaar q a a d a y o w a x a k u q o r a n xarafka (b) ee Qodobka 72 XHC, falal ciqaabeedka lid ku ah xoolaha dawladda ama hanti kasta oo ay leeyihiin Hay'adaha ku qoran xubinta 1aad ee Qodobka 15aad ee sharcigaas, waxaa ka reeban Xeer Ilaaliyuhu inuu dacwadahaas xiri.

Xeer darsayaa xogwarranka, haddii ay la
noqoto . .. ah ee la hordhigay ayan ahayn ku-
wo si . u caddan kara in meeshaas uu dembi ku jiro
uu ku kacay qofka lagu soo eedeeyey, wu-
in baaritaan cusub uu sameeyo xafiiska
Baarista oo uu ka helay xogwarranka
fal . tilmaamo ka siinaaya wixii marag
iyo wixii kale oo xiriir la
leh . keeni karto in Xeer Ilaa-

Awoodda Guddiga Dhexe ee Baarista.

Guddiga Dhexe ee Baarista iyo qof kastoo ka socda Guddigaa marka uu hawshiisa baarista ku jiro, wuxuu awood u leeyahay iyadoo aan waxba lagu xirin.

I) Inuu, meel kastoo caam ah ama gaar ah oo lagu maamulo hantida Qaranka galaa, eegaa buugagga xisaabaadka iyo wixii qoraallo la xiriira, lacagta taal iyo waraaqaha lacagta ah xoolaha iyo w:xii kalee ay Dawladdu leedahay qof kastaba ha sitee;

II) Inuu, Xafiiskiisa ugu yeerto qof kasta si uu u weydiiyo kana hubsado arrimaha la xiriira hawlihiisa;

III) Inuu eegaa, ka soo qaataa ama soo qabtaa warqad kastoo ku saabsan xisaabaadka ama qoraallada idaariga ah, waraaqaha gaarka ah ama kuwa caamka ah, xoolo kasta oo marakac u noqon kara in uu jiro fal keeni kara ku xadgudub Sharci ama Xeer Dawladeedba si loo daryeelo hantida Dawladda.

b) Qof kasta oo Guddiga Dhexe ee Baaristu u baahdo waxaa ku waajiba inuu gacan ku siiyaa si ay hawshaa u gutaan.

t) Haddii loo baahdo ama ay la noqoto lagama maarmaan, Guddiga Dhexe ee Baaristu wuxuu u yeeran karaa Ciidanka NSSta, Booliska, Guulwadayaasha Ummadda oo khasab ay ku tahay inay fuliyaan hawsha loogu yeeray.

j) Inuu oggolaadaa, burriyaa ama uu la wareegaa hawl kasta oo ku lug leh xilka Guddiyada Baarista Xisbiga ee Gobollada ha noqoto mid ku saabsan kontroolka xisaabaadka Xisbiga ama kan Dawladda iyo wixii kale oo hawl ah oo loo xilsaaray.

## Qodobka 4aad

*(Hawlo Guud)*

*Guud ahaan, hawlaha Guddiga Dhexe ee Baaristu uu ku lahaan karaa hay'adaha Dawladda waa kuwa hoos ku qoran:*

1. La habaynta hay'adaha ku lug leh ilaalinta hantida Ummadda Sharciyada iyo nidaamyada xisaabaha la xiriira.
2. La sicodka kontaroolka, la-talinta iyo hawlgelinta hay-adaha Dawladda ee Baarista iyo Ilaalinta Hantida Dadweynaha, iyadoo isla markaasna Guddigu uu ka qaadanaayo warbixin joogta ah.
3. La socodka Miisaaniyadda xiritaanka Dawladda oo looga soo gudbinaayo Xafiiska hantidhawrka Guud sannad walba marka la xiro Miisaaniyadda.
4. Inuu hubiyaa in hay'ad kasta ee Dawladda ay ku dhaqanto nidaamka xisaabaadka iyo kan bakhaarraha iyo in loo soo gudbiyaa Miisaaniyadda Hay'ad kasta marka ay xirto si Guddigu uu ula socdo habka loo maamulay xoolaha Dadweynaha.

## Qodobka 5aad

1. Dembi kastoo lid ku ah Mabda'a Xisbiga, Hawlaha Qaranka, shuruucda iyo Xeerarka Dalka, Guddiga Dhexe Baaristu wuxuu awood u leeyahay in uu tallaabo sharci ah ka qaado.
2. Qof kasta oo ka mid ah xubnaha ama Hawlwadeennada Guddigu way baari karaan, qaban karaan, xiri karaan qof kastoo uu galo tuhun la garaysan karo ee ku raad leh falalciqaabeedka ku xusan xubinta (1) Qodobkaan.
3. Guddigu wuxuu baari karaa, weydiin karaana qof kasta sida uu ku tacbay iyo meeshay ka soo gashay Hantidiisu, haddii ayan yeelan sal Sharci ah Hantidaas lahaanshaheedu, Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu si ku meel gaar ah gacanta ugu dhigo hantidaas, isla markaana wuxuu la cuskanayaa xubinta 2aad ee Qodobka 3aad ee Sharcigan.

## Qodobka 6aad

*(Guddiyada Baarista Xisbiga ee Gobollada)*

Guddiyada Baarista Xisbiga ee Gobollada waxaa xil ka saaran yahay in ay baaraan xoolaha iyo hantida Qaranka ku siman Gobolka ay ku shaqo leeyihiin, iyagoo isticmaalaya awood uu Sharcigan u oggol yahay Guddiga Dhexe ee Baarista Xisbiga, warbixin joogto ahna u soo gudbinayaa.



## Qodobka 7aad

*(Xeer Nidaamiye)*

Xeer Nidaamiye iyo faahfaahiya Sharcigan waxaa soo saari kara Madaxweynaha isagoo dhegeystay Guddiga Dhexe ee Baarista.

## Qodobka 8aad

*(Burrin)*

Sharci kasta ama xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la burriyey.

## Qodobka 9aad

wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee

Muqdisho, 3.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*SHARCI L. 9 ee 3 Febraayo 1977, sharciga Ganacsiga iyo dhaqaalaha.*

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka barakaysan;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 58 ee 14.9.1970 ee ilaalinta ascaarta;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 12 ee 26.9.1964 iyo xeerarkiisa kala ah 203 iyo 204 ee la taariikh ah ee ganacsiga iyo Dhaqaalaha;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 12 ee 1.8.1966 ee ilaalinta Canshuuraha;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 54 ee 10.9.1970 dhawritaanka badbaadada Ummadda;

MARKAY U MUUQATAY: In ay tahay lagama maarmaan in dadweynaha laga nabadgeliyo cuna qabataynta iyo cadaadinta. ku madulnoolaashaha salka ku haya ee uga imaanaysa ganacsiga, maamulka iyo qaybinta waxyaabaha dadweynuhu aad ugu baahan yahay.

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo daryeelka caafimaadka dadweynaha iyo nabadgelyadiisa;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wariirrada;

WUXUU GUDDOOMIYEY

SHARCIGA SOO SOCDA;

Qodobka 1aad

Macnay

Waxyaabaha dadweynuhu u baahan yahay: Waxaa loola jeedaa, waxyaabaha la cuno ama la cabbo oo dhan, dharka, Maacuunta, daawada dadka iyo duunyada, alaabta, dhismaha oo dhan, shidaalka, iyo waxe kasta oo laga ganacsado.

Ganacsi xaaraan ah; Waxaa loola jeedaa, ganacsi kasta oo cabeecad ahaan ama qiime ahaanba u khiiaafsan sicirka loo gooyey ama loo yaqaan, waxyaabaha lagu tilmaamay xubinta hore ee sharcigan.

Qodobka 2aad

Haddii aan si kale loo micneeyo, xadgudub kasta oo laga galo sharcigan waxaa loo aqoonsanayaa dembi ay awood u leedahay qaadistiisa Maxkamadda Badbaadada Dalka:



Qodobka 3aad

Qof kasta oo ganacsato ah ama loo xilsaaray hawsha guud ama gaar ee maamulka qaybinta waxyaabaha dadweynuhu u baahan yahay ee ku iibiya qiimo dheeraad ah ama ka badan kii ay Dawlad du u goysay ama uruursada ama qariya ama baadi'iya iyo qof kasta oo gacan ku siiya waxyaabaha hore lagu soo sheegay oo isla xubinta ku yaal, ama lagu helo haaysashada alaabtaas, wuxuu gelayaa dembi kontrobaan waxaana lagu ciqaabayaa:

b) ilaa 18 bilood oo xarig ah ama Sh. SO. 3.000 ilaa 8.000 oo ganaax ah, haddii shayga dembiga lagu galay aanu qiimihiisu ka badnayn 1.000 (kun) Shilin;

t) 6 bilood ilaa 2 sano oo xarig ah ama Sh. SO. 6.000 ilaa 24.000 oo ganaax ah, haddii shayga dembiga lagu galay uu qiimiihiisu u dhexeeye 1.001 shilin ilaa 5.000 (shan kun);

j) ilaa 5 sani oo ganaax ah ama Sh. SO. 60.000 ilaa 30.000 oo ganaax ah, haddii shayga dembiga lagu galay uu qiimahiisu u dhexeysi Sh. SO. 5.001 ilaa 50.000 (shan kun konton kun);

x) 3 ilaa 10 sano oo ganaax ah ama Sh. SO. 15000 ilaa 50.000 oo ganaax ah, haddii shayga dembiga lagu galay uu qiimahiisu u dhexeeyo Sh. SO. 50.001 ilaa 100.000 (kuntonkun - boqolkun);

kh) ilaa 25 sano oo xarig ah ama Sh. SO. 50.000 ilaa 150.000 oo ganaax ah, haddii shayga dembiga lagu galay uu qiimahiisu ka badan yahay Sh. SO. 100.000 (boqolkun.)

2. Haddii badeecadda lagu tilmaamay Qodobka 1aad qaybtiisa hore ee sharcigan qiimaheeduna gaarayo Sh. SO. 100.000 qiimaheeda kor u qaadidiisa, qarinteeda iyo uruursigeeda, loola jeedo, in lagu cuuryaamiyo, la qaso xaaladda dhaqaalaha ee dalka, la iska horkeeno Dawladda iyo dadweynaha, ama laga dhaliyo qas iyo jahawareer dalka gudahiisa, ciqaabta waxa la gaarsiin karaa Xabsi daa'in ama dil, hadba sifaalaha dembigu siduu yahay.

Qodobka 4aad

Qof kasta oo xil ka saaran yahay ilaalinta, kormeeridda, fulinta ama ogaada jabinta sharcigan oo aan ka qaban waajibkii ka saarnaa, ama aan soo saarin hay'adaha ku shaqada leh, haddii uusan dembiga ka qayb gelin, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 5 sano oo xarig ah, ama ciqaab lacageed oo ah ilaa 5.000

Qod. 5aad

Guddiga Xisbiga ee Gobolka ama Degmada, Boliiska iyo Nabadsugidda waxay ka dalban karaan qof kasta oo ganacsato ah inuu uga soo warramo waxa dadweynaha aad ugu baahan yahay oo uu hayo ama iibiyo meel kale ugu kaydsan.

3) Qofkii raaci waaya codsashada Hay'adahaas ee warbixin ka keeni waaya waxa uu hayo ee ku tilmaaman kore mudoo 14(afar iyo toban) maalmood aan ka badnayn ama been ka sheega warbixintiisa wuxuu gelayaa dembi, waxaana lagu ciqaabi karayaa ilaa (Hal) sano oo xarig ah ama ciqaab lacageed oo ah 12.000 ama labadaba.

Qod. 6aad

Qof kasta oo dalka soo geliya ama lagu helo isagoo ku haysta ama ganacsanaya badeeco laga mamnuucay Waddanka, sabab caafimaad, shaqaale ama nabadgelyo awgeed, wuxuu gelayaa dembi culus ciqaabtiisuna tahay 2 ilaa 10 sano oo xarig ah ama ciqaab lacageed ilaa Sh.S. 24.000.

Qod. 7aad

Gaadiidka lagu helo isagoo sida ama loo isticmaalay soo gelinta Waddanka, badeeco dalka laga mamnuucay, daryeelka caafimaadka dadweynaha, ka hortaga cudurro halis ah, dhaqaalaha iyo nabadgelyada aawgeed, haddii qofka gaadiidka wata ama leh uusan caddeyn inuusan xog ogaal u ahayn badeecada mamnuuca ah ee uu sido, qiimaha iyo tirada badeecadu inkasta ha la ekaatee, gaadiidka waa laga dhacaya cidda'leh ama wadata, waxaana la wareegaya Dawladda.

Qod. 8aad

Qof kasta oo lagaga xukumay ciqaab xarig ah oo aan ka badnayn 10 sannadood dembi uu dhigayo sharcigan, waxaa loo ogolaanayaa inuu xabsiga ku beddesho lacag, hadduu dembigu yahay kii ugu horreeyay oo noociisa ah ee uu galay.

Qod. 9aad

Badeecadda iyo daawada dembiga lagu galay ee lagu qabtay eedeysanaha ama wakiilkiisa waa lala wareegayaa, khasnadda Dawladda lagu shubayaa wixii ka soo baxa, shatigana waa lala noqon karaa.

Qod. 10aad

Waxaa la baabi'yey sharciga lambarkiisu yahay 58 soona baxay 14.9.1970 iyo sharcigii iyo xeerkii kale ee ka soo horjeeda ama aan la socon sharcigan.

Qod 11aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qod. 12aad

Waxaa la farayaa qof kasta inuu u hogaansamo sharcigan cid walbana ka doono inay u hoggaansanto.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3 Febraayo 1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



SHARCI L. 10 ee 3 Febraayo 1977, Baadi'inta Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar, 1969,

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lambarkoodu yahay 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1.7.1976, kuna saabsan Habka Maamulka Dalka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 14 ee soo baxay 3dii Juunyo, 1962 iyo beddelaaddii ka dambeysay;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1.7. 1976, kuna saabsan Dhismaha Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aannadii Golaha Dhexe ee XHKS, Kalfadhigiisii saddexaad;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA;

Qodobka 1aad

*(Baabi'inta Wasaaradda Arrimaha Gudaha)*

Marka laga billaabo 3da Febraayo, 1977, waxaa la baabi'iyey Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee lagu dhisay xeerka lambarkiisu yahay 2, ee soo baxay 20kii Luulyo 1964.

Qodobka 2aad

*(Dhismaha Agaasinka Guud ee Dawladda Hoose)*

Waxaa la dhisay Agaasinka Guud ee dawladda Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga.

Qodobka 3aad

*(Xilka Agaasinka Guud ee Dawladda Hoose)*

1. Xilka Agaasinka Guud ee Dawladda Hoose wuxuu noqonayaa:
   (a) Inuu qabanqaabiyo iskuna dubbarido maamulka Dawladda Hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka;
   (b) Inuu isku dubbarrido hawlaha la xiriira Mashaariicda Horumarinta Reer Myiga;

(t) Inuu la socdo amniga gudaha oo idil, gaar ahaanna nabadgelyada iyo xasiloonaanta reer Guuraaga;

(j) Inuu la socdo waxna ka qabto arrimaha la xiriira Gargaarka Abaaraha iyo dhibaatooyinka guud ee bulshada;

(x) Inuu habeeyo Miisaaniyadda Agaasinka Guud iyo Miisaaniyadda Dawladda Hoose;

(kh) Inuu fuliyo, hubiyana socodsiinta hawl·hii socdey, kuna habeeyaan Sharciyada iyo wareegtooyinka Madaxweynaha, isagoo had walba tusaale iyo tilmaamo ka qaadanaya Madaxtooyada JD.S.

2. Dawladda Hoose ee Xamar way ka baxsan tahay kuwa hoos imaanaya Agaasinka Guud.

Qodobka 4aad

*(Hoos imaansho)*

Agaasinkani wuxuu hoos imaanayaa Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Qodobka 5aad

*(Dhaqangelin)*

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



SHARCI L. 11 ee 3 Febraayo 1977, Dhismaha Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969,

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lam. yahay 17. 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976 kuna saabsan Habka Maamulka Dalka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. yahay 14 ee 3da Juunyo 1962 iyo beddelaaddii ka dambeysay kuna saabsanaya Habka Maamulka Dawladda;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la dhiso Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Golaha Dhexe ee Xisgiba Hantanwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed kalfadhigiisi 3aad.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

*(Dhismaha Wasaaradda)*

Marka laga billaabo 3da febraayo 1977, waxaa la dhisay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Qodobka 2aad

*(Ujeeddada Wasaaradda)*

Wasaaradda waxaa loo dhisay:

— inay ururiso, warbixinna ka siiso Dawladda muruqmaalka Dalka (manpiwer),

— inay dhowrto hirgelinta sharciga la xiriira shaqaalaha,

— inay maamusho hawlaha la xiriira shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah intaba,

— inay qabanqaabiso tababarrada shaqaalaha si ay sare ugu qaaddo garaadkooda siyaasiga ah;

— inay siiso tababarro xag xirfadeed iyo xag maamul intaba;

— inay ku dadaasho badbaadinta iyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha iyadoo qiimeynaysa kaalinta weyn ee shaqaaluhu kaga jiraan horumarinta dhaqaalaha dalka iyo hirgelinta Mabaadi'da Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan.

— iyadoo la kaashanaysa hay'adaha bulshada ee ku shaqo leh inay wax ka qabato, horreyna u mariso arrimaha la xiriira naafada.

Qodobka 3aad

*(Hoos Imaansho)*

Wasaaradda Waxaa Hoos imaanaya:

— Agaasinka Guud ee Shaqaalaha Dawladda ee hore;

— Waaxda Shaqada ee Wasaaraddii hore ee Shaqada iyo Isbiirtiga;

— Machadka Horumarinta iyo Maareynta Maamulka (Sidam).

Qodobka 4aad

*(Dhaqan Gelid)*

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 3.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



SHARCI L. 12 ee 3 Febraayo 1977, Dhismaha Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Deskedaha.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21 Oktoobar, 1969,

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 17, 18, iyo 19 ee 1da Luulyo 1976 kuna saabsan Habka Maamulka Dalka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 14 ee 3 Juunyo 1962 iyo beddelaaddii ka dambeysay, kuna saabsan Habka Maamulka Dawladda;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la dhiso Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Kal-fadhigii 3aad.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

*(Dhismaha Wasaaradda)*

Marka laga billaabo 3da Febraayo 1977, waxaa la dhisay Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.

Qodobka 2aad

*(Ujeeddada Wasaaradda)*

Ujeedda Wasaaradda loo dhisay waxay tahay horumarinta Gaadiidka Badda iyo Hawlaha la xiriira Dekedaha Dalka, sisare loogu qaado awoodda shaqada xagga Badda iyo hagaajinta Maamulka Dekedaha.

Wasaaraddu waxay xil weyn iska saari doontaa sidii loo xoojin lahaa, loona wanaajin lahaa xiriirka Badda ee gudaha iyo adduunweynahaba, iyadoo la wareegaysa wixii xil ah ee sharcigan ka saarnaa xagga Dekedaha iyo Gaadiidka Wasaaraddii hore ee Kalluunka iyo Gaadiidka Badda.

Qodobka 3aad

*(Hoos Imaansho)*

Wasaaradda waxa hoos imaanaya Wakaaladaha Soo socda:

(a) Wakaaladda Dekedaha;

(b) Wakaaladda Gaadiidka Badda;

(t) Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta.

Wasaaraddu waa inay isku dubbarriddaa, kormeertaana Wakaaladaha Wasaaradda hoos yimaadda ee kor ku xusan.

Qodobka 4aad

*(Dhaqan Gelid)*

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 3.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



3 ee 3 Febraayo 1977, Dhismaha Ciidanka Booliska Soo-oo hoos imaanaya Madaxweynaha J.D.S.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaan-1969;

ARKAY: Sharciyada kala ah 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1976, kuna saabsan Habka Maamulka Dalka;

ARKAY: Sharciga Lam. yahay 14 ee soo baxay 3dii Luul-1962 iyo beddelaadaii ka dambeysay;

ARKAY: Sharciga lam. yahay 2 ee soo baxay 23kii Disem-1972 ee lagu dhisay Ciidanka Booliska;

Golaha Dhexe ee Xisbiga Soomaaliyeed, Kalfadhigiisii 3aad,

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

*(Hoos Imaansho)*

Booliska oo lagu dhisay sharciga lam. yahay 2 ee soo Disember, 1972, ee horey u raacranaan jirey shaqo ahaan Arrimaha Gudaha, marka laga billaabo 3da Febraayo wuxuu toos ugu xirnaanayaa Xafiiska Madaxweynaha J.D.S.

Qodobka 2aad

*(Dhaqangelin)*

Sharcigani wuxuu dhaqan geliyayaa 3da Febraayo 1977, waxaana soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 3.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

## BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER WASARADDA GAR. IYO ARR. DIINTA ee 22.1.77, kordhin ku saabsan Xubnaha Guddiga xeer dejinta iyo la tashiga L. 17

WASIIRKA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA

ISAGOO ARKAY: Xaash'da 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka;

ISAGOO ARKAY: Dekreetada lambarkeedu yahay 99 soona baxday 20.11.1976, ee lagu magacaabay Guddiga Xeer Dejinta iyo la tashiga;

ISAGOO AQOONSADAY: In lagama maarmaan ay tahay in la kordhiyo xubnaha guddiga Xeer dej'nta iyo la Tashiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

DEKREETADA HOOS KU QORAN:

### Qodobka 1aad

Xubnaha guddiga xeer dejinta iyo la tashiga ee lagu magacaabay Dekreetada lambarkeedu yahay 99 soono baxday 20 Nofember 1976 waxaa lagu kordh'nayaa Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin:

1. Dr. Xasan Cumar Maxamed
2. Dr. Nuurta Xaaji Xasan

### Qodobka 2aad

Dekreetadaan si degdeg ah bay u dhaqan gelasaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22.1.1977,

WISIIRKA KGARSOOR. IYO AR. DIINTA
(Jaalle Dr. Cabd'salaam Sheekh Xuseen)



## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

BANKIGKA DHEXE EE SOOMAALIYA

XEER NIDAAMIYE IAMBAR 103 EE 27.10.1977

UJEEDDO: HEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD.

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

xeerka lam. 12 ee 62kii , lam. 8 ee 29kii Ok- Daadihinta ganac- Dhexe ee Soomaal'ya u lagu lacagaha qalaad ee qiimaha lacagaha qalaad ee sida joogto ahaan naga soo

GARTAY: In la ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeenna.

OGSOON: In horey loo qaatay go'aan degdeg ah lam. 225 ee 27.10.1977 sida Sharc'ga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, lambar 27 ee 26kii Nofember, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos billaabo 29.01.1977 waxaa go'aankaan lagu soo Faafinta Rasm'ga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadi-

| Lacagta | Qalaad | Heerka Iibsashada 00 Sh. SO. Ah | Heerka Gadidda 00 Sh. SO. Ah |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 10.5754 | 10.7869 |
| DM | 1.00 | 2.6160 | 2.6683 |
| LIT. | 141.49 | 1.0000 | —— |
| LIT. | 138.66 | —— | 1.0000 |
| F.FR. | 1.00 | 1.2563 | 1.2814 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5038 | 2.5539 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

AGAASIMAHA GUUD
*(SaciidMaxamed Cali)*

27.01.1977,

*GUDDOOMIYAHA*
*(Cumar Axmed Cumar)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA GALGUDUUD

Ujeeddo: Jeegga wareega lam. 100896 28.7.76ka

Maxkamadda Gobolka Galguduud kaddib markii ay aragtay Arjiga uu Jaalle Cabdi Maxamuud Warsame Neero uu soo qortay Agaasimaha Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Dh|Mareeb, taariikh 31.8.76ka, iyo warqadda uu Bank:ga Ganacsiga Ummaddu u soo diray Maxkamadda Gobolka Galguduud taariikh 28.10.76 waxaa si aan shaki ku jirin ugu caddaatay Maxkamadda Gobolka in Jaalle Cabdi Maxamuud Warsame Neeri uu ka lumay jeegga wareega lam. 100896, 28.1.76 ee ujeeddada ku qoran, sidaas darteed maxkamaddu waxay amar ku bixinaysaa in Jaalle Cabdi Maxamuud Warsame Neero loo celiyo jeegga ka lumay Lacagtiisii oo ah Sh. SO. 133.00 oo keliya kaadib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

Dhuusa-Mareeb 17.11.76,

Guddoomiyaha Max. Gob. G|guduud Dh-mareeb
Dr. Maxamed Xasan Maxamed

L. 41



## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

dacwadda kor ku qoran;

waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

D.L. 9.9.65 No. 2; .umidda Buu-
1.515.

WUXUU AMRAYAA

ka dib markii ay ka soo wa-
lagu shaaciyo faaf'nta ras-

WAXAA LA CODSANAYAA

jeegaga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Faarax Ma-
Cali ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la
mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnaay.

Muqdishso, 15.2.77

Gudoom. Maxkamadda Gobolka Banaadir
*(Jaalle Cabdullaahi Daahir Baare)*

L. 42

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bang'ga;

HADDU ARKAY: qod. 69 D.L.9.9.65 N.2;lumidda Buugga keydka Lam.10275 Sh. So.2.25 Bagigga Ganacsiga laanta 2aad.

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusboneysiiyo Buugga keyda ka dib ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegaga cusub ee la cameyn doono gacanta la saaro Maxamed Maxamuud Axmed ama qof isia asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan ku soo sheegnaay

Muqdisho, 17.2.77

Gudoom. Maxkamadda Gobolka Banaadir
*(Jaalle Cabdullaahi Daahir Barre)*

L. 43



## OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED — BAYL

Shirkadda War-
qayb galaan
Xarunta Shir-
ama shanta galabnimo,
waayo mar la-
ay isku saacadda kor ku

Shirkad ee lahaanshaha Saamiyaasha ku qoranu
ka Shirkadda «Warshadda Kiimikada
inay shan maalmood ka hor ay
shirkadda ilaa intii shirku ka dhamaa-

### ARRIMAHA DOODDA:

dheellitirka xisaabaadkii sannadii 1976 (Ap-
dell'anno d'esercizio 1976)

Intaas iyo wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga

GUDDIGA AMAAMULAYAASHA GUUD

43 | Bis